



## BADQABKA TALLAALADA COVID-19 MA OGTAHAY?

### ***Sideen ku ogaan karaa inuu tallaalku yahay mid BADQABA?***

- Tallaaladu waxay soo mareen **tijaabo adag oo ay ku jiraan tijaabooyin waaweyn** taas oo lagu sameeyey tobanaan kun oo qof, si loo damaanad qaado badqabkeeda.
- Tallaallada ayaa **shati ka heley Wakaaladda Daawada Yurub** ka hor intaan lasoo galinin Midowga Yurub.

### ***MAXAY tahay sabataan u qaadanaayo tallaalka?***

- Si uu kaaga ilaaliyo cudur halis ah oo sababay infekshanka COVID-19 uuna u yareeyo cudurada halista ah iyo dhimashada.
- Si uu nooga caawiyo dhaqaalaha iyo nololaha bulshada inay bilaabaan inay u dhaqaaqaan dhanka caadiga ah.
- Waa tan ugu wanaagsan **hab wax ku ool ah oo looga hortago COVID-19.**
- Si looga hortago infekshin u horseedi kara saameyn caafimaad oo muddo dheer ah.

### ***Imisa Ayu Tallaalku YAREEYAA KHATARTA COVID-19 iyo dhibaatooyinkiisa?***

- Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay markii hore filaysay in tallaalka COVID-19 uu ka hortagayo cudur ama hoos u dhigayo darnaanta ugu yaraan 50% dadka la tallaalo. Hase yeeshee, tijaabooyinka caafimaad ayaa muujiyay in **tallaalada qaar ay kahortagi karaan cudurada halista ah iyo dhibaatooyinka ka yimaada COVID-19 90 - 95% kiisaska.**

### ***Maxay yihiin DHIBAATOYINKA WEHLIYA tallaalka?***

- Tijaabooyinka laga qaaday tobanaan kun oo qof ayaa muujiyay in **Dhibaatooyinka wehliya ay yihiin kuwo muddo-gaaban oo xalisma dhib la'aan ama dhaawac la'aan, oo aad ugu eg tallaallada badankood.**
- Waxyeelooyinka ugu caansan waa **xanuun iyo guduudasho meeshii lagaa duray, madax xanuun, qaboob, daal, murqo xanuun ama qandho soconeysa maalin ama labo.** Dhibaatooyinkan wehliya waxay muujinayaan in nidaamkaaga difaaca uu ka jawaabayo tallaalka. Waad qaadan kartaa daawooyinka sida paracetamol si ay kaaga caawiso xakameynta astaamahaan haddii aad isku aragto.
- Dareen-celinta xasaasiyadda ka dib markii la qaatay tallaalka ayaa ahayd **mid dhif ah.** Dadka qaata tallaalka ayaa noqon doona **kuwo la kormeero ilaa 15 daqiiqo ka dib tallaalka** haddii ay dhacdo falcelin daran oo xasaasiyadeed oo naadir ah. Xarumaha tallaalka ayaa loo qalabeeyay inay daaweeyaan falcelinada noocaas ah.

UNHCR Malta maaha isha rasmiga ah ee macluumaadkan. UNHCR Malta ayaa tarjuntay macluumaadkan, si ay kuugu suurto gasho inaad ku hesho luqad aad fahanto, isla markaana aad kula wadaagi karto qaxootiga iyo magangalyo-doonka ku sugan Malta.

**Wixii dheeraad ah oo la turjumay macluumaadka ku saabsan Tallaalka COVID-19 fadlan booqo**

**<https://www.unhcr.org/mt/news/covid-19-information-for-malta>.**

Xigasho: Agaasinka Horumarinta Caafimaadka iyo Kahortagga Cudurada, Malta

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo <https://deputyprimeminister.gov.mt/en/health-promotion/covid-19/Pages/vaccines.aspx>. Degelkan si joogto ah ayaa loo cusbooneysiisay hadba sida loogu baahdo.